



## **Qorshaha Degaan-hoosaadka Skyway-West Hill iyo Liiska Baahiyada Bulshada Ballanqaadka Wada-shaqeynta**

Degemada King iyo dadka deggan iyo ganacsiyada bulshada Skyway-West Hill ayaa si wadajir ah ugu wada shaqeynaya horumarinta Qorshaha Degaan-hoosaadka iyo Liiska Baahiyada Bulshada inta u dhaxeysa bilaha Agoosto 2020 iyo Disembar 2021. Golaha Degmada King ayaa ka-dib kala shaqeyn doona bulshada ansaxinta Qorshaha Degaan-hoosaadka iyo Liiska Baahiyada Bulshada marka ay taariikhdu tahay Juun 2022. Goobaha ka-qaybgalaya ayaa waxaa ka mid noqonaya Bryn Mawr, Hilltop, Lakeridge, Skycrest, Skyway, Campbell Hill, Earlington, iyo Panorama View.

### **Qorshaha Degaan-hoosaadka ayaa...**

Dejin doona himilo 20-sano ah Skyway-West Hill iyo siyaasado lagu taageerayo himiladaasi. Waxaa lagu dari doonaa Istiraatiijiyadda Isticmaalka Dhulka ee ay ansaxisay Golaha Degaanka King ee bisha Agoosto 2020.

### **Liiska Baahiyada Bulshada waa...**

Liiska adeegyo, barnaamijyo, iyo mashaariic horumarineed oo waaweyn oo ay bulshadu aqoonsatay oo taageeraya himilada bulshada. Waxaa uu wargelin doonaa go'aamada miisaaniyadda Degmada King ee maalgelinnada mustaqbalka ee Skyway-West Hill. Qorshe Hawleedka Skyway-West Hill (SWAP) oo ay diyaarisay Skyway Solutions ayaa bixinaya bar bilowga Liiska Baahiyada Bulshada.

### **Codka bulshada ayaa la maqli doonaa**

Si Qorshaha Degaan-hoosaadka iyo Liiska Baahiyada Bulshada ay uga turjumaan kala duwanaanshaha codadka iyo mudnaanaha wadareed ee bulshada, waa muhiim in bulshada iyo degmada ay yeeshaan wada-hadal laba-dhinac ah iyo in ay wada shaqeeyaan. Sinnaanta iyo cadaaladda sinjiga waa udub-dhexaadka dadaalka, sidaa awgeed waxaan doonaynaa in aan ku darno codadka kooxaha iyo dadka degaanka ee taariikhi ahaan si ku filan loo matalin.

Iyada oo sabab u ah cudurka safmarka ah ee COVID-19 iyo xaddidaadaha lagu soo rogay kulamada qof ahaaneed, iskaashigan intiisa badan waxaa uu ka dhici doonaa kulamo lagu qabto muuq aragga internet-ka, telefoonka, iyada oo loo marayo sahanno barta internet-ka ah, iyo iyada oo loo marayo warqadaha boostada oo dadka degaanka loo diro kuwaas oo aan heli karin agab elektaroonig ahaan ah. Agabka qoraalka ah intiisa badan ayaa waxaa loo turjumi doonaa Af Fiitnaamees, Af Isbaanish, iyo Af Soomaali. Turjumaadda luuqadaha kale ayaa la heli karaa marka la codsado. Turjumaanno luuqadeed ayaa lagu diyaarin doonaa shirarka bulshada ee waaweyn ama marka loo baahdo.

Bar internet ayaa la abuuray si uu bulshadu gacan uga siiyo in ay ka wada shaqeeyaan himilada, siyaasadaha, iyo liiska baahiyada. Bartan internet-ka ayaa la cusboonaysiin doonaa guud ahaan inta uu socdo geeddi-socodka:

<https://publicinput.com/Skyway>

Fadlan aannu oggaano haddii aad jeclaan lahayd in aad ka qaybgasho. Fadlan macluumaadkan la wadaag deriskaaga.

**Su'aalo?** Kevin LeClair | [kevin.leclair@kingcounty.gov](mailto:kevin.leclair@kingcounty.gov) | 206-477-2717